

**REPUBLIC OF**



**SOMALILAND**

**THE PRESIDENT**

REF: JSL/M/XERM/249-807/122011

DATE .....13/12/11.....

**XEER MADAXWEYNE No: 0182/122011**

**Dhaqan-galka Wax Ka Bedelka iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka  
Golayaasha Deegaanka iyo Madaxtooyada Xeer Lr. 20/2011 Lifaaqa 3aad**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Helay: Go'aanka Golaha Wakiilada JSL ee Go'aan Lr. GW/KF-16/551/2011, ee Ansixinta Wax Ka Bedelka iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka Golayaashak Deegaanka iyo Madaxtooyada Xeer Lr. 20/2011 Lifaaqa 3aad;


Markuu Arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

**Wuxuu Soo Saaray;**

Qodobka 22<sup>aad</sup> oo ah habka doorashada Golayaasha Deegaanka;

Qodobkan oo ahaa habka liistada waxaa laga dhigay oo loo badalay sidan;

1. Xisbi/Urur kasta oo doonaya in uu ka qayb galo doorashada Golayaasha Deegaan, waa in uu komishinka Qaranka u gudbiyo liiska musharaxiinta uu u xulay inay uga tartamaan doorashada oo degmaysan, kaas oo ku salaysan tirada kuraasida Degmo kasta loo xadiday, una qoran si taxane ah, waana in komishinku siiyaa musharax kasta astaan u gaar ah.
2. Kuraasta Degmo-doorasho, waxaa Axsabtu/Ururadu ku kala helayaan habka saami qaybsiga (Proportional Representation System) ee kuraasida iyo codadka Xisbi/Ururkasta ka helo Degmadaas, iyadoo uu Xisbiga/Ururkuna ay musharaxiintiisu ku kala guulaysanayaan sida ay u kala codbadan yihiin.
3. Musharaxiinta ku guulaysan waaya doorashada Deegaanka waxay noqonayaan kayd, iyadoo loo kala qaadanayo sida ay u kala codbadan yihiin, marka xubin ama xubno ka mid ah Golaha Deegaanku uu baneeyo xilka.





**Qodobka 33<sup>aad</sup> Faqradiisa 4<sup>aad</sup>**

**Qodobkan 33<sup>aad</sup> Faqradiisa 4<sup>aad</sup> oo ahaa qofka isu taagaya doorashada Golayaasha Deegaanka waa in aanu/aanay da'diisu/Dadeedu ka yaraan 35-jir sanadka doorashada**

**Waxaa loo bedalay qodobka sidan:**

**Qofka isu taagaya doorashada Golayaasha Deegaanka waa inuu/aanay Da'diisu/Dadeedu ka yaraan 25-jir sanadka doorashada.**

Allaa Mahad Leh,

**Axmed Maxamed Silanyo**  
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

